Warbixinta Kama Dambaysta ah ee Goobjoogayaasha Caalamiga ee Doorashooyinka Somaliland

Guud Mar

Markii ay bishu ahayd 13 kii November ee sannadkii 2024, in ka badan 638,000 oo reer Somaliland ah ayaa u dareeray goobaha cod bixinta si ay u soo doortaan Madaxweynaha iyo saddex Xisbi Qaran oo doorashooyinka ku tartami doona tobanka sannadood ee soo socda. Hannaanka doorashadu waxa uu ku soo ahaa mid si wanaagsan loo maamulay, iyo maalin doorasho oo nabdoon, iyada oo maalintaas ay dhamaan reer Somaliland ay fuliyeen xaqa ay u leeyihiin in ay codkooda dhiibtaan. Hase yeeshee doorashooyinku ugamay qabsoomin qayb ahaan ama guud ahaanba shan ka mid ah 24 ka degmo doorasho ee dalka arrimo la xidhiidha xagga ammaanka darted, iyada oo inta labada doorasho ee isa saaran u soo baxdayna ay ka yarayd 53%. Si kastaba ha ahaatee, natiijada doorashada uu ku soo baxay xisbiga ugu weynaa mucaaradku, isla markaana xisbi cusubna loogu doortay in uu ka mid noqdo saddexda xisbi qaran, ayaa ah mid ay aqbaleen dhamaan musharaxiinta, xisbiyada iyo daneeyayaasha kale oo ay ka mid yihiin dadweynaha reer Somaliland.

Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro), musharraxa xisbiga Wadani ayay Komishanka Doorashooyinka Qaranku ku dhawaaqeen in uu noqdo Madaxweynaha dalka 19kii bisha November. Cirro waxa uu helay 407,908 oo cod, taas oo u dhiganta boqolkiiba 63.93 ee codadka guud iyo in ka badan 28 dhibcood oo uu ka horreeyay madaxweynihii talada hayay, Muuse Biixi Cabdi kaas oo metelayay xisbiga Kulimiye oo helay boqolkiiba 35.34 codadkii doorashada. Codaynta xisbiyada qaranka, Wadani, Kaah iyo Kulmiye ayaa helay tiradii codadka ugu badnayd isla markaana ku guulaystay in ay u tartamaan doorashooyinka tobanka sannadood ee soo socda. Maxkamadda Sare ayaa ansixisay natiijada kama dambaysta ah 27 bishii November.

Doorashooyinkani waxa ay daaha ka faydeen meelo uu hannaanka doorashooyinka ee Somaliland uu ka hooseeyo marka loo eego heerarka dimuqraadiyadeed ee caalamiga ah.

Hannaanka sharci ee doorashooyinku waa mid leh dammaanad ku filan, laakiin waxa jira waxyaalo ka dhiman iyo meelo uu madmadow ka muuqdo, kuwaas oo la xidhiidha joogtaynta doorashooyinka iyo xorriyadda xisbinimada. Doorashooyinka Madaxtooyada waxa ay ahayd in la qabto bishii November ee sannadkii 2022 laakiin waxa dib loo dhigay laba sannadood iyada oo la raacayo hab-dhaqan jiray doorashooyinkii hore ee Somaliland. Sidoo kale, in la xaddido tirada xisbiyada siyaasadeed ee ku tartami kara doorashada, iyada oo aan la oggolaan musharraxiin madax bannaani waxa ay khilaafsan tahay mabaadii’da caalamiga ah ee la aqoonsan yahay iyo sidoo kale dammaanadda xorriyadda ahaanshaha ee ku xusan

Dastuurka Somaliland. Hannaanka diiwaangelintu waxa uu ahaa mid gaaban marka loo eego adkaantiisa iyo kharashka badan ee ku baxaya.

Doorashooyinka waxa ka masuul ahaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka (KDQ) kaas oo raacayay wakhtiyo go'an oo sharci ah waxaanuu sameeyay diyaar garowgii loo baahnaa ee doorashooyinka iyada oo ay jireen caqabado xagga shaqada ahi. Waxa jiray kalsooni ballaadhan oo lagu qabay awoodda Komishanka eek u saabsan in ay samayn karaan diyaar garowga hawl-fulineed iyo ka lojistikada ee doorashooyinka, iyo sidoo kale awoodda ay tahay in ahaadaan dhexdhexaad. Si kastaba ha ahaatee, wakhti aad u yar ayaa la siiyay in ay ku hirgeliyaan barnaamij dhamaystiran oo ku saabsan aqoonta iyo macluumaadka codbixiyaha, iyada oo ay jirto xaalad cakiran oo ku saabsan doorashooyinka isku sidkan. Iyada oo aanay jirin qaab-dhismeed la xidhiidha shaqaale joogto ah iyo shaqaale ku sugan dhamaan dalka oo dhan, awoodda uu Komishanku u leeyahay in uu diiwaan geliyo codbixiyayaasha isla markaana uu qabto doorashooyin ayaa noqonaysa mid xaddidan.

Diiwaan gelinta codbixiyayaashu waa mid furan waxaanay u baahan tahay in codbixiyayaashu mar kale dib ugu soo noqdaan goobaha diiwaan gelinta si ay kaadhadhkooda codaynta u qaataan; taasina waxa ay dalka ku keenaysaa caqabado hor leh iyada oo qaar ka mid ahi ay ku nool yihiin noloshii reer guuraaga. Diiwaan gelintii ugu dambaysay ee la sameeyaa waxa ay ahayd bishii January ee 2023, waa 22 bilood ka hor markii doorashooyinku ay qabsoomeen.

Guud ahaan, ololaha doorashadu waxa uu ahaa mid si nabadgelyo leh ku qabsoomay loona tartamay si nidaamsan. Ololuhu waxa uu ka socday warbaahinta iyo baraha bulshada, laakiin muddada ololuhu waxa uu ahaa mid kooban oo urur ama xisbi kasta loo asteeyay laba maalmood oo keliya in ay sameeyaan isu soo baxooda. Daah-furnaanta iyo heerka sinnaanta xagga fursadaha ayaa walaac ka muuqday. Ma jirto xaddidaad la xidhiidha sida uu xisbigu ama ururku uu u adeegsanayo wakhtiga loo siiyay ololaha, sidoo kale ganaaxyada la xidhiidha jebinta hab-dhaqanka iyo anshaxa loo dejiyay in ay ku ololeeyaan ururrada iyo xisbiyadu Ayaan ahayn mid ku filan in ay xadiddo ololaha xisbiyada waaweyn ee maaliyadda badan haysta.

Sharcigu waxa uu mamnuucayaa takoorka, waxaanuu farayaa hay'adaha dawladdu in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon oo ay wax kaga qabanayaan. Haweenku waxa ay door muhiim ah ka qaateen maamulka goobaha codaynda waxaana codeeyay tirooyin aad u badan oo haween ah. Si kastaba ha ahaatee, toddobada xubnood ee komishanka doorashooyinka mid keliya ayaa haween ka ahayd, isla markaana musharaxiinta madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenka midna haween kumuu jirin. Dastuurka Somaliland waxa uu ka mamnuucayaa dadka naafada ah ee codaynayaa in ay u tartamaan xilalka dawladda, iyada oo ay jiraan dadaallo lag taageerayo dadka naafada ah maalinta codaynta, haddana waxa ay ahaaneen qaar tiradoodu kooban tahay.

Ku dhawaad 300 oo goobjoogayaal dhexdhexaad muwaadiniin ah iyo 100 goobjoogayaal caalami ah ayaa ka qayb qaatay daah-furnaanta. Goobjoogayaasha Caalamiga ahi waxa ay joogeen 13 ka mid ah 19 degmo ee ay codayntu ka socotay. Muraaqibiinta xisbiyada iyo ururrada ayaa iyaguna joogay dhamaan goobaha cod bixinta ee dalka oo dhan.

Goobjoogayaashu waxa ay sheegeen in waxoogaa khaladaad ah oo xagga maamulka ahi ay jireen laakiin tirinta codadku waxa ay ahayd mid daah-furan. Qarsoonaanta codayntu may ahayn mid la ilaaliyay dalka oo dhan.

Warbaahintu waxa ay awood u lahayd in ay wararka u soo gudbiyaan si madax bannaan, iyada oo aanay cidina faragelin ku hayn, iyaga oo ka soo warramayay ololaha iyo doorashadaba iyo dhacdooyinka isla markaana la xidhiidhayay siyaasiyiinta. Xisbiyada iyo ururrada siyaasaddu waxa ay u arkayeen war tebinta warbaahinta oo ay ku jirto warbaahinta dawladdu in ay ahayd mid dhexdhexaad iyo caddaalad ah, laakiin iyada oo ay inta badan barnaamijyada warbaahintu lacag ahayd, xisbiyada lacagta badan haysta ayaa helayay war tebin ka badan kuwa kale.

Goobjoogayaasha Caalamiga ahi waxa ay soo jeediyeen 26 talo oo ujeedadoodu tahay in kor loogu qaado qabashada doorashooyinka Somaliland iyo in lagu taageero dadaallada loogu jiro in ay si buuxda ula jaan qaadaan waajibaadka iyo heerarka caalamiga ah ee doorashooyinka dimuqraaddiga ah. Liiska talooyinka oo dhamaystiran waxa laga heli karaa dhamaadka warbixinta.

Talooyinka ugu mudan soo jeedimahaasna waxa ka mid ah:

- *Iyada oo in badan oo doorashooyinka Somaliland ah ay ku yimaadeen dib u dhac, isla markaana ay soo dhowdahay doorashadii Golaha Wakiilladu, waxa loo baahan yahay in si degdeg ah loo helo xal dhamaystiran loo helo in dadka codaynayaa ay helaan xuquuqda doorasho ee ay ku codaynayaan isla markaana lagu dooranayo, kaas oo aanay raadayn Karin xaaladaha siyaasadeed ee is bedbeddelayaa. Dammaanaddaasi ha noqoto mid sharci ama maamul, waa in ay si dhab ah u sugtaa in qof kasta oo reer Somaliland ah oo qaan gaadh ahi uu awood u leeyahay in uu wax doorto isla markaana uu u istaagi karo in la doorto, hay'ad kasta oo Somaliland ahina ay u taagnaato in ay si dhab ah u ilaaliso xuquuqdaas.*

- *In wax ka beddel lagu sameeyo xeerka si waafaqsan heshiisyada xuquuqda aadamaha ee caalamiga ah ee lagu koobayo saddex xisbi oo keli ah, lana oggolaado musharaxiin madax banaani in ay tartanka ka qayb geli karaan.*

- *In la xaqiijiyo qarsoonaanta cod bixinta ee dadka aan wax akhriyin waxna qorin ee codaynaya iyo kuwa kale ee u baahan in laga caawiyo codaynta ee reer Somaliland, casharrada ugu wanaagsan ee laga bartay dalalka kale waa in la dhaqan geliyaa doorashooyinka soo socda. Waxa muhiim ah in la xaqiijiyo awoodda ay cod bixiyayaashu u leeyihiin in ay muujiyaan doonistooda iyaga oo wax culays ahi ku saarnayn cidda ay u codaynayaan sida ay doontaba ha noqotee.*

- *In la qorsheeyo sidii Komishanka Doorashooyinku uu shaqaale joogto ah ugu yeelan lahaa waaxahooda oo dhan si loo ilaaliyo xogta iyo macluumaadka komishanka oo ay*

ku jirto arrimaha jinsiga iyo waxbarashada codbixiyayaashu, iyo in ay sidoo kale xafiisyo joogto ah ku yeeshaan dhamaan dalka oo dhan ilaa heer degmo si komishanka loogu dhaweeyo codbixiyayaasha iyo ururrada bulshada ee taageeraya hannaanka doorasho ee heer kasta.

- *In dib u eegis lagu sameeyo hannaanka diiwaangelinta codbixiyayaasha iyada oo laga eegayo aragtida codbixiyaha. Hannaanka uu aasaaska u yahay codbixiyuhu waxa uu kor u qaadayaa kalsoonida bulshadu ay ku qabto Komishanka Doorashooyinka iyo hannaanka doorashada guud ahaan. Waxaanan hannaankan ka mid ah xaqiijinta in codbixiyayaashu ay helaan kaadhadhkooda codbixinta isla marka la diiwaangelinayo.*

15. Lifaaqa Talo Soo Jeedinta

Hannaanka Sharciga iyo Nidaamka Doorashada

- *Iyada oo in badan oo doorashooyinka Somaliland ah ay ku yimaadeen dib u dhac, isla markaana ay soo dhowdahay doorashadii Golaha Wakiilladu, waxa loo baahan yahay in si degdeg ah loo helo xal dhamaystiran loo helo in dadka codaynayaa ay helaan xuquuqda doorasho ee ay ku codaynayaan isla markaana lagu dooranayo, kaas oo aanay raadayn Karin xaaladaha siyaasadeed ee is bedbeddelayaa. Dammaanaddaasi ha noqoto mid sharci ama maamul, waa in ay si dhab ah u sugtaa in qof kasta oo reer Somaliland ah oo qaan gaadh ahi uu awood u leeyahay in uu wax doorto isla markaana uu u istaagi karo in la doorto, hay'ad kasta oo Somaliland ahina ay u taagnaato in ay si dhab ah u ilaaliso xuquuqdaas.*

- *Xaqa uu qofku u leeyahay in uu taageero ama ku biiro Meesha uu doonaa maaha mid la xaddidi karo haddii aanay jirin xaalad aad u daran oo kellifaysaa. Shuruucda, habraacyada maamul, iyo ku dhaqankaba waa in dhamaan la beddelaa si loogu oggolaado dadka reer Somaliland in ay si xorriyad ah cidda ay rabaan ugu biiri karaan.*

- *Hab-raaca maamul ee diiwaan gelinta ururrada siyaasadda waa in la fududeeyaa. Hannaanka diiwaangelinta maamul iyo sharci waa in dib u eegis lagu sameeyaa, waana in ururradii loo diiwaan geliyay doorashooyinkii sannadkii 2024 ka lagala tashadaa. Dib u eegista iyo wax ka beddelka waxa mar dambe lagu kabi karaa in tallaabooyinka qaar laga dhigo qaar is wada iyada oo la adeegsanayo tiknoolajiyadda isgaadhsiinta.*

- *In wax ka beddel lagu sameeyo xeerka si waafaqsan heshiisyada xuquuqda aadamaha ee caalamiga ah ee lagu koobayo saddex xisbi oo keli ah, lana oggolaado musharaxiin madax banaani in ay tartanka ka qayb geli karaan.*

Komishanka Doorashooyinka Qaranka

- *In la qorsheeyo sidii Komishanka Doorashooyinku uu shaqaale joogto ah ugu yeelan lahaa waaxahooda oo dhan si loo ilaaliyo xogta iyo macluumaadka komishanka oo ay ku jirto arrimaha jinsiga iyo waxbarashada codbixiyayaashu, iyo in ay sidoo kale xafiisyo joogto ah ku yeeshaan dhamaan dalka oo dhan ilaa heer degmo si komishanka loogu dhaweeyo codbixiyayaasha iyo ururrada bulshada ee taageeraya hannaanka doorasho ee heer kasta.*

Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

- *In dib u eegis lagu sameeyo hannaanka diiwaangelinta codbixiyayaasha iyada oo laga eegayo aragtida codbixiyaha. Hannaanka uu aasaaska u yahay codbixiyuhu waxa uu kor u qaadayaa kalsoonida bulshadu ay ku qabto Komishanka Doorashooyinka iyo hannaanka doorashada guud ahaan. Waxaanan hannaankan ka mid ah xaqiijinta in codbixiyayaashu ay helaan kaadhadhkooda codbixinta isla marka la diiwaangelinayo.*

- *In la xaqiijiyo in qof kasta oo reer Somaliland ahi oo gaadhay da'dii codbixintu, kuna nool meel kasta oo dalka ahi ay gudan karaan xaqa ay u leeyihiin in a codeeyaan; diiwaanka codbixiyaha waa in si joogto ah loo cusboonaysiiyaa, weliba marka doorashooyinku soo dhow yihiin, ama diiwaangelinta codbixiyayaasha waa in laga dhigo mid joogto ah oo mar kasta socota.*

Ololaha Doorashada

- *In la oggolaado in ololaha doorashadu socdo muddo rasmi ah oo ka dheer inta hadda jirta si loo helo olole doorasho oo lagu tartami karo, loona yareeyo adeegsiga dariiqyo aan rasmi ahayn isla markaana aan nidaamsanayn, iyada oo loo oggolaanayo codbixiyayaashu in ay la kulmaan musharaxiinta tartamaysa, xisbiyada, ururrada iyo mudnaanta siyaasadahooda.*

- *Hab-raacyada dhaqaalaha kaambaynka waa in la sameeyaa si loo helo in la soo bandhigo ama la handi-dhawro dhaqaalaha xisbiyada siyaasadda iyo kharashaadka ay ku bixiyeen ololaha doorashooyinka.*

- *In la kordhiyo ganaaxyada, cuno qabataynta iyo ciqaabaha lagu soo rogo cidda jebisa xeerka anshaxa iyada oo la gaadhsiinayo heer xisbiyada iyo ururrada oo dhami ay ka waantoobaan.*

Waxbarashada Codbixiyaha iyo Macluumaadka

- *Waxbarashada codbixiyuhu waa in uu la jaanqaadaa qaybaha kala duwan hannaanka doorashada, oo ay ku jirto muhiimadda ay leedahay diiwaangelinta codbixiyaha iyo baahida loo qabo in la qiimeeyo musharixiinta iyo xisbiyada iyada oo loo eegayo madashooda. Macluumaadka codbixiyuhu waa in uu awoodda saaraa dhowr toddobaad ka hor diiwaangelinta codbixiyayaasha iyo maalinta doorashada arrimaha khuseeya sida la isu diiwaangeliyo iyo sida loo codeeyo.*

Ka Qaybgelinta Haweenka, Dadka Naafada ah iyo Dadka laga Tirada badan yahay

- *Dawladdu waa in ay baadhitaan ku samaysaa hannaanka sharci ee doorashooyinka iyo xalka isu dheelitir la'aanta ee xuquuqda dhamaan dadka isu taagaya doorashada, iyada oo si gaar ah isha loogu haynayo qodobbada sharciga ee kor u qaadaya ka qaybgalka haweenka, xubnaha dadka laga tirada badan yahay iyo dadka naafada ah.*

- *Xisbiyada siyaasaddu waa in ay taageeraan musharaxiinta haweenka ah, taas oo ay ku jirto in kor u qaadis xirfadeed la sameeyo, iyo in ay u fidiyaan taageero dhaqaale. Waa in ay sameeyaan shaqaalaysiin iyo istiraatiijiyado tababar, isla markaana dib u habayn ku sameeyaan hab-raacyada dimuqraadiga ah ee gudaha si loo xaqiijiyo liisaska musharaxiintu in ay noqdaan qaar loo siman yahay. Taas waa in ay ku jirto in Meesha laga saaro ama la yareeyo lacagaha diiwaan gelinta ama magacaabista musharaxiinta ee laga qaado haweenka musharaxiinta ah ee hanka leh.*

- *Waa in tababar loo qabtaa saraakiisha doorashooyinka kaas oo ku saabsan sida loo caawiyo dadka naafada ah, si loo xaqiijiyo in la helo deegaan ku dhisan ixtiraam isla markaana loo dhan yahay ee dhamaan goobaha codaynta. Waxa lagama maarmaan ah in la sameeyo Wacyi gelin joogto ah si loo xaqiijiyo in dadka naafada ahi ay ogaadaan xuquuqdooda iyo taageerada ay helayaan xilliga doorashada. In la kordhiyo tirada agabka taageerida socodka (baaskeelka curyaamiinta, biraha socodka iyo farta indhoolayaasha), isla markaana loo sameeyo adeegyo gaadiid doorashooyinka soo socda si loo gaadho dhul badan, loona xaqiijiyo in dadka naafada ahi ay geli karaan goobaha codaynta.*

- *Komishanka Doorashooyinka Qaranku waa in ay qiimayn ku sameeyaan sida ay hab-raacyada doorashooyinku u fududaynayaan ka qaybgalka xubnaha reeraha laga tirada badan yahay, dadka naafada ah iyo haweenka. Taas waxa qayb ka noqon karta in la sameeyo xog ururin iyo gorfayn, isla markaana laga qayb geliyo ururrada bulshada, daneeyayaasha iyo xisbiyada siyaasadda. Qaab-dhismeedyo joogto ah sida waaxda Jinsiga ama urur-hawleedka naafada waa in Komishanka Doorashooyinka Qaranku uu sameeyaa si loo xaqiijiyo hirgelinta siyaasadaha ugu wanaagsan iyo hawlgallada xagga barnaamijyada maamul.*

Warbaahinta

- *Guddida Xeerka anshaxa saxaafadda waa in si degdeg ah loo magacaabaa isla marka lagu dhawaaqo maalinta doorashadu dhacayso. Marka doorashooyinka lagu dhawaaqo, Guddida Xeerka anshaxu waxa ay dib u eegis ku samayn kartaa xeerka anshaxa si ay wax ka bedel iyo kaabis ugu samayso haddii loo baahdo, iyada oo raacaysa muddo loo cayimay. Waa in sidoo kale ashaxa saxaafadda iyo la socodka warbaahinta lagu soo daro dadka caanka ka ah baraha bulshada (oo aan lagu koobnaan keliya suxufiyiinta baraha bulshada isticmaasha).*

- *Komishanka Doorashooyinka Qaranku waa in uu sharci ka soo saaraa arrimaha la xidhiidha barnaamijyada lacagta lagu bixiyo ee warbaahinta si loo xaqiijiyo in warbaahintu ay ku calaamadiso banaamijyadaas in lacag lagu bixiyay, waana in lagu daraa qodob ka hadlaya tiro cayiman oo lacag xayaysiis ah oo ay xisbiyada iyo ururrada siyaasadda ka qaadaan warbaahinta dawladdu. Guud ahaan, doorashooyinka ka dib, barnaamijyada lacagta lagu bixiyay waa in sidaas lagu calaamadiyaa.*

- *Komishanka Doorashooyinka Qaranku heshiisyada uu kula jiro warbaahinta waa in la sii wadaa lana sii kordhiyaa, iyada oo ay ku jirto heshiisyada warbaahinta caadiga ah iyo kuwa caanka ka ah baraha bulshadu si loo sii faafiyo macluumaadka Komishanka Doorashooyinka, isla markaana la sameeyo la socod warbaahineed iyo barnaamijyo tababar oo saxaafadda ah oo ka duwan. Waxa loo baahan yahay in la helo heshiisyo rasmi ah badan oo u dhexeeya Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyo warbaahinta si loo hirgeliyo waxbarashada codbixiyayaasha iyo macluumaadka si sidan imika aad uga ballaadhan.*

- *Fal dembiyeedyada ku sugan xeerka ciqaabta guud ee raadaynaya warbaahintu ee ka soo horjeeda xorriyadda hadalka uu damaanad qaaday dastuurku waa in Meesha laga saaraa. Sumcad dilka waa in loola macaamilaa in uu yahay arrin shicib. Si gaar ah, hannaanka dib u habaynta xeerka saxaafadda (kaas oo imika ah qabyo-qoraal sharci)*

waa in mudnaanta la siiyaa, waana in uu daboolaa warbaahinta caadiga ah, ta internet ka iyo baraha bulshada intaba.

Maalinta Doorashada

- *In la xaqiijiyo qarsoonaanta cod bixinta ee dadka aan wax akhriyin waxna qorin ee codaynaya iyo kuwa kale ee u baahan in laga caawiyo codaynta ee reer Somaliland, casharrada ugu wanaagsan ee laga bartay dalalka kale waa in la dhaqan geliyaa doorashooyinka soo socda. Waxa muhiim ah in la xaqiijiyo awoodda ay cod bixiyayaashu u leeyihiin in ay muujiyaan doonistooda iyaga oo wax culays ahi ku saarnayn cidda ay u codaynayaan sida ay doontaba ha noqotee.*

- *In la qiimeeyo heerka ay gaadhsiisan tahay codaynta carruurta aan qaan-gaadhin, iyada oo qiimayntan lagu salaynayana in la dhaqan geliyo waxyaalihii lagaga hortegi lahaa.*

- *Si loo kordhiyo daah-furnaanta natiijada doorashooyinka, nuqul ka mid ah natiijada waa in lagu dhejiyaa bannaanka goob kasta oo codbixineed ka dib marka ay shaqaalaha goobtu dhamaystiraan.*

- *In la tababarro loo qabto shaqaalaha goobaha codbixinta marka ugu horraysa ee ay suuragal tahay, iyada oo taasna lagu darayo hannaan waxbarasho oo ku salaysan mushkilad-xallin iyo wada shaqayn, oo aan ahayn keliya mid ku kooban in fasal la fadhiisto oo wax lagu barto, iyada oo sidoo kale la xaqiijinayo in shaqaalaha la dejiyo Meesha ugu dhow goobaha codbixinta ee suuragal ah.*

Natiijada Kama Dambaysta ah

- *Si ay u suuragasho in Komishanka Doorashooyinka Qaranku ay maamulaan ku dhawaaqista qayb ka mid ah natiijada, haddii loo baahdo, waa in la sameeyo nidaam isgaadhsiineed oo u dhexeeya madaxa goobta codaynta iyo xarunta guud ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka.*

Goobjoogayaasha Dalka iyo kuwa Caalamiga ah

- *Komishanka Doorashooyinka Qaranku waa in ay doorashooyinka ka hor heshiis is af garad la galaan goobjoogayaasha dalka iyo kuwa caalamiga ah kaas oo qeexaya xuquuqda iyo waajibaadka Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyo wufuudda ay khusayso. Marka heshiiskaa la saxeexo, macluumadkaas waa in la gaadhsiiyaa dhamaan shaqaalaha Komishanka ee heer qaran, gobol, degmo iyo goobaha codbixinta.*

- *Goobjoognimada ururrada bulshadu waxa ay muhiim u tahay daah-furnaanta hannaanka doorasho. Ururrada bulshadu waa in ay qorshe u dejiyaan in ay goobjoogayaal ku filan u diraan goobaha codbixinta isla markaana xaqiijiyaan in ay joogaan dalka oo dhan iyo muddada doorashada oo dhan iyaga oo ka faa'idaysanaya dhamaan inta suuragalka ah ee fursadaha maaliyadeed ee ay ka heli karaan dalka iyo kuwa caalamiga ahba.*